folkehelseinstituttet

U KUURGALKA XAALADAHA/MEELAHA OSLO EE LA FILAYO IN LA ISKU QAADSIIYO COVID-19 (la barbardhigeyaal)

KU QOFKA LAGU CASUUMAY KA QAYBGALKA DARAASAD KU SAABSAN XAALADAHA KORDHINAYA HALISTA QAADISTA COVID-19

Ma ka mid tahay dadka helay casuumaad ay Machad Caafimaadka Dadweynuhu ku soo diray farriin sms ah oo ku saabsan ka qaybgalka daraasad ku saabsan xaaladaha kordhiya suurtagalnimada qaadista covid-19? Bisha maars waxa qaybo ka mid ah dadka degan Oslo loo soo dirayaa casuumada ka qaybgalka daraasadda. Halkan ayaad ka akhrisan kartaa faahfaahin ku saabsan daraasad iyo waxa arrintu ku saabsan tahay.

Ku saabsan baadhitaanka

- Waxa lagugu casuumaya ka qaybgalka baadhitaan ku saabsan xaaladaha/meelaha ka jira Oslo ee kordhinaya suurgalnimada qaadista fayrusta koroonada (covid-19).
- Waxa laguu casuumayaa waayo si nasiib ah ayaad uga mid noqotay dad laga soo saaray Diiwaanka Dadka si loogu casuumo daraasaddan.
- Ujeedada baadhitaanku waa in la ogaado meelaha/xaaladaha kordhinaya halista qaadista covid-19.
- Jawaabaha laga heli baadhitaanku waxay gacan ka geysanayaan in la helo aqoon muhiim ah oo lagu joojin karo faafitaanka Oslo
- Isla su'aalaha waxannu weydiin doonnaa dad laga soo xulay dadka degan Oslo oo laga helay covid-19 si loo barto waxyaala keenaya in dadka qaar qaadaan fayrusta, dad kalena qaadin.
- Su'aaluhu waxay ku saabsanaan doonaan waxa aad samaysay iyo meelaha aad joogtay 14-kii maalmo ee ka horeeyey ka qaybgalka daraasadan haddii aad oggolaatay ka qaybgalka.
- Maalmo kadib marka aad heshid farriin sms ah oo wadata cinwaanka macluumaadkan waxa ku soo wici doona shirkadda daraasadaha suuqa ee Kantar oo u shaqaynaysa Machadka Caafimaadka Dadweynaha. Waxay kaa codsan doonaan in aad af ahaan ku oggolaato ka qaybgalka baadhitaanka. Ka qaybgalku waa ikhtiyaar. Haddii aad rabto in aad ka qaybgasho waxad lagaa qaadi doonaa waraysi telefoon oo soconayaa 10 ilaa 12 daqiiqo

Waa maxay ujeedada waraysigu?

Fayrus cusub oo koroona ah (SARS-CoV-2) oo keenaysa cudurka covid-19 ayaa ku fiday adduunka oo dhan iyo Noorway ba. Qayb muhiim ah oo ka mid ah istaraatiijiyada Noorway ee ku saabsan xakamaynta faafitaanka ayaa ah raad-raaca faafitaanka oo toos loo beegsanayo halka uu ka yimi si looga hortago in uu sii faafo. Nasiibdarro waxa ilaa deyrtii la arkay in ku dhawaad 30 % dadka degan Oslo ee laga helo fayrusta la ogaan karin meesha qofku ka soo qaaday. Taas darteed waxannu u baahan nahay in aad naga caawiso in aannu si nidaamsan u ogaano meelaha suurtagalnimada faafitaanku ku badan yahay. In la fahmo halka faafitaanku ka imanayo iyo qaabka uu ugu sii fido bulshada ayaa muhiim u ah horumarinta talooyinka dadka la siinayo iyo talaabooyin lala beegsado si loo yareeyo sii faafitaanka. Ujeedada guud ee daraasadu waa in la ogaado xaalada/meelaha ka jira Oslo ee kordhinaya halista qaadista fayrusta koroonada. Fulinta daraasadan waxa lala kaashanayaa degmada Oslo.

Waa maxay sababta adiga laguugu casuumay ka qaybgalka?

Waxannu adiga kuugu casuunay ka qaybgalka waayo waxaad jirta da' u dhaxaysa 18 iyo 70 sanno waxaanad degan tahay Oslo. Dad degan Oslo ayaa si nasiib ah looga soo saaray Diiwaanka Dadka waxaana lagu casuumayaa in ay ka qaybgalaan iyagoo noqonaya la barbardhigeyaal caafimaad qaba.

Waxa iyana la soo xuli doonaa dad kale oo tiro leeg oo xilli dhaweyd laga helay fayrusta koroonada (covid-19) oo noqonaya laga helayaal. Ka qaybgalka waxa u shuruud ah in aad degan yahay Oslo oo da'daadu u dhaxayso 18 iyo 70 sanno.

Maxaa ka qaybgalku ka kooban yahay?

- Maalmo kadib marka aad heshid farriin sms ah oo wadata macluumaad waxa ku soo wici doona shirkada daraasadaha suuqa ee Kantar oo u shaqaynaysa Machadka Caafimaadka Dadweynaha
- Waxay kaa codsan doonaan in aad af ahaan ku oggolaato ka qaybgalka baadhitaanka
- Ka qaybgalku waa ikhtiyaar, marka aad rabto ayaad ka iska joojin kartaa ka qaybgalka inta waraysigu socdo.
- Haddii aad rabto in aad ka qaybgasho waxa lagaa qaadi doonaa waraysi telefoon oo soconayaa 10 ilaa 12 daqiiqo
- Xilliga waraysiga waxannu ku weydiin doonaa su'aalo guud oo ku saabsan qofka aad tahay, xaalada nololeed iyo tirada dadka kula degan guriga. Kadibna waxannu ku weydiin doonaa su'aalo ku saabsan wixii aad samaysay 14-kii maalmood ee ka horeeyey ka qaybgalka daraasadda. Ugu dambayn waxannu ku weydiin doonnaa su'aalo ku saabsan sida aad u aragto talaabooyinka kala duwan ee la rabo in lagu yareeyo ku faafitaanka bulshada.
- Waa baaadhitaan hal mar ah, mana lagu weydiin doono in aad markale ka qaybgasho isla baadhitaankan ama wax kale oo ku saabsan daraasadan.

Faa'idooyinka iyo dhibaatooyinka ka iman kara ka qaybgalka

Haddii aad ka qaybgasho waxaad gacan ka geysanaysaa in Machadka Caafimaadka Dadweynuhu helo aqoon muhiim ah oo ku saabsan cudurka covid-19 iyo qaabka uu ugu faafo Oslo. Aqoontaas waxa loo isticmaalayaa sidiii loo qaadi lahaa talaabooyin haboon oo lagaga hortagayo sii faafitaanka.

Wax daaweyn ama tijaabo/baaritaan ah kuma jiraan ka qaybgalka. Ka qaybgalku waa ka jawaabista waraysi telefoon ah.

Maxaa lagu samaynayaa macluumaadka lagaa helo?

Maclumaadkaaga la diiwaangeliyo waxa loo isticmaalaya keliya sida lagu soo sheegay ujeedada mashruuca. Kordhinta habka isticmaalka iyo muddada la haysan karo waxa la samayn karaa keliya haddii ogolaansho laga helo Komishan-Anshaxeed Goboleed iyo hay'adaha dawladeed ee kale ee ay khuseyso. Waxaad xaq u leedahay in aad aragto macluumaadka lagaa diiwaangeliyey in la saxo wixii khalad ah ee la diiwaangeliyey. Waxa kale oo aad xaq u leedahay in aad aragto sida loo sugayo ammaanka maarayenta macluumaadka.

Dhammaan macluumaadka kugu saabsan waxa loo maarayn doonaa si sir ah oo waafaqsan xeerarka ilaalinta macluumaadka shakhsiyeed ee markasta jira.

Marka la maaraynayo macluumaadka kugu saabsan, waxa macluumaadka lagugu garan karo (sida magaca iyo lambarka dhalashada) lagu beddeli doonaa fure. Waxa la dhahaa sumad-tiris. Tiro kooban oo ka mid ah shaqaalaha mashruuca ayaa heli karta xidhiidhka u dhexeeya furaha iyo macluumaadkaaga shakhsiyeed. Cilmi-baadheyaashu waxay arki karaan keliya macluumaadka la sumad-tiray. Masuulka mashruuca ayaa ka masuul ah in macluumaadkaaga loo isticmaalo si ammaan ah. Suurtagal noqonmayso in ka qaybgalayaasha daraasadda la garto marka la soo bandhiho natiijada daraasadda.

Macluumaadka kugu saabsan waxa la kaydin doonaa shan sanno kadib marka daraasadu dhammaato iyadoo ujeedadu tahay in la samayn karo dib u hubin. Gunaanadka mashruuca waxa laga dhigay 31 desember 2025, laakiin waa la kordhin karaa muddada mashruuca, haddii oggolaansho laga helo Guddi-Anshaxeedka daraasadaha caafimaadka (REK).

Ka qaybgalku waa ikhtiyaar waanad ka laaban kartaa oggolaanshaha marka aad doonto

Ka qaybgalka daraasaddu waa ikhtiyaar. Marka aad doonto adiga oo aan sheegin wax sabab ah ayaad ka laaban kartaa oggolaanshaha. Wax dhib ah ma kugu keeni doonto adiga ama la socoshada ama daaweynta aad hesho haddii aad diido ka qaybgalka ama mar dambe ka laabato oggolaanshaha. Haddii aad ka laabato oggolaanshaha, waa la joojinaya daraasadda lagu samaynayo macluumaadkaaga. Haddii aad ka baxdo daraasadda waxaad codsan kartaa in la tirtiro macluumaadka kugu saabsan, haddii aan weli lagu darin daraasado cilmiyeed oo soo baxay. Haddii aad mardambe rabtid in aad ka baxdo ama qabto su'aalo ku saabsan daraasadda, waxaad la xiriiri kartaa masuulka mashruuca adoo kala xiriiraya e-boosta ama telefoonka.

Habka loo isticmaalay macluumaadkaaga waxaad uga caban kartaa Hay'adda ilaalinta xogta (Datatilsynet) iyo kormeeraha macluumaadka shakhisga ee Machadka Caafimaadka Dadweynaha (eeg macluumaadka xidhiidhka ee hoos ku qoran).

Daraasadda waxa oggolaaday Guddi-Anshaxeedka daraasadaha caafimaadka (REK).

Marka la eego xeerka cusub ee ilaalinta macluumaadka shakhsiyeed, hay'adda masuuliyadda maareynta, oo ah Machadka Caafimaadka Dadweynaha, iyo masuulka mashruuca Pawel Stefanoff ayaa mid kasta si gaar ah masuul uga yahay maaraynta macluumaadkaagu ku tiirsan yahay sharciga. Mashruucan waxa uu ku tiirsan yahay Xeerka Ilaalinta Macluumaadka Shakhsiyeed ee Midowga Yurub qodobka 6 lr. 1a iyo qodobka 9 lr. 2a iyo oggolaanshahaaga.

Ma qabtaa su'aalo ku saabsan daraasadda ama ka qaybgalkeeda?

La xidhiidh e-boosta: korona-oslo@fhi.no ama telefoonka: Masuul mashruuc Pawel Stefanoff på tel 906 72 697.

Haddii aad qabto su'aalo kale oo ku saabsan ilaalinta macluumaadka shakhsiyeed waxaad la xiriiri kartaa kormeeraha macluumaadka shakhisga ee Machadka Caafimaadka Dadweynaha oo e-boostu tahay: personvernombud@fhi.no.

Waxa iyana Hay'adda ilaalinta xogta (Datatilsynet) lagala xidhiidhi karaa e-boosta: postkasse@datatilsynet.no.